

Liiska Hubinta COVID-19 ee Dadka Reer Ohio ee Waayeelka ah iyo Dadka leh Xaalado Caafimaad oo Daba Dheeraaday

Ka Ilaalinta COVID-19

Waxa kamid ah dadka halista sare ugu jira inay si daran ugu bukoodaan COVID-19 kuwa ah 65 jir ama ka wayn, haweenka uurka leh, dadka sigaarka cabba, dadka leh xaalado caafimaad oo daba dheeraaday iyo/ama daran sida kansarka, xanuunka kelyaha, cudurka loo yaqaan chronic obstructive pulmonary (xanuun sambabada ku dhaca oo neefsiga qofka dhiba), xanuunka wadnaha, cayilka, sickle cell disease (xaalado saamayn xun ku yeesha himogolobiinta dhiigga), ama sonkorowga. Guji [halkan](#) si aad u hesho liiska dhammaystiran ee xaaladaha ku galin kara halis sare.

Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay si xooggan ugu talinaysaa in dadka kamid ah qaybahan ay qaadaan tallaabooyinka soo socda:

- Kala eeg caafimaadkaaga astaamo muujinaya COVID-19:
 - Xummad ama qarqaryo.
 - Qufac.
 - Neefsiga oo kugu adkaada ama neefsiga oo ku dhiba.
 - Daal.
 - Murqo ama jir xanuun.
 - Madaxanuun.
 - Dhadhanka ama urta oo aad iska waydo.
 - Cune xanuun.
 - Cabbur ama duuf.
 - Yalaalugo ama matag.
 - Shuban.

Haddii aad yeelato kuwan ama astaamo kale oo warwar abuuraya, la xiriir bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka isla markiiba. Waxa muhiim ah in qiimayn lagugu sameeyo sida ugu dhakhsaha badan.

- Caawimo raadso isla markiiba haddii aad leedahay calaamado muujinaya xanuun halis ah, sida neefsiga oo kugu adkaada ama neefsiga oo ku dhiba, xanuun ama cadaadis joogto ah oo laabta ah, wareer ama inaad hurdada ka toosi kari waydo, dabhaha ama wejiga oo buluug ku noqda, ama

astaamo kale oo daran ama warwar abuuraya.

- La tasho bixiyaha daryeelkaaga caafimaad si aad u hesho hagitaan ku aaddan wixii astaamo ay tahay inaad iska fiiriso iyo goorta ay tahay inaad caawimo dalbato.
- Guriga joog intii aad karto ee suurtoagal ah oo cidna yayna ku soo booqan. Isku day inaad bannaanka u baxdo oo aad lugayso amase aad madadaalo kale samayso haddii ay suurtoagal tahay.
- Markii aad baxdo, xiro waji gashad oo marada ah, u jirso ugu yaraan 6 fuudh dadka kale, oo gacmahaaga nadiifi badanaa.
- Waydiiso dadka kale inay qabtaan hawl maalmeedka muhiimka ah, sida soo iibsiga raashinka ama soo qaadista daawooyinka.
- Haddii ay ka fursan waydo inaad adigu tagto, xiro waji gashad marada ah oo booqo goobaha marka ay u dhawdahay inayna dad badani joogin. Tukaanada raashinka, farmasiyada, iyo goobaha kale qaarkood waxay leeyihiin saacado loogu talagalay dadka halista badan kujira.
- Kaydso daawooyin iyo saad kugu filan dhawr toddobaad. Haddii ayna jirin cid kuu keentaa, waydiiso farmasiga bal haddii uu daawada boostada kuugu soo diri karo ama haddii aad qaadan karto adigoo safka galin ama aad gaari ku soo doonato oo daaqadda lagaaga dhiibi karo.
- Qorshee waxaad samayn doonto haddii adiga, ama dadka aad ku tiirsan tahay inay ku taageeraan, ay bukoodaan.
- Ilaali caafimaadka niyadeed ee naftaada iyo xubnaha qoyskaaga. Kula xiriir xubnaha qoyskaaga, saaxiibadaa, iyo jaarka maqal iyo muuqaal, taleefan ama iimeyl ugu yaraan si toddobaadle ah si aad u samayso isku xirnaan.

La cusboonaysiiyey Noofambar 3, 2020.

Macluumaad dheeraad ah, booqo coronavirus.ohio.gov.

Jawaabaha su'aalaha aad ka qabto COVID-19, wac 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634).

Caafimaadkaaga maskaxdu wuxuu u muhiim yahay sida caafimaadka jirkaaga. Haddii adiga ama ehelkaagu aad waajahaysaan walaac la xiriira aafada koronafayras, caawimo ayaa diyaar ah 24 saac maalintii, toddobada maalmood toddobaadkii. Wac COVID-19 CareLine 1-800-720-9616.

CUDURKA KORONAFAYRAS 2019 Ohio

Department
of Health

Naftaada iyo dadka kaleba ka ilaali
COVID-19 adigoo tallaabooyinkan qaadaya.

KAHORTAG


Macluumaad dheeraad ah wac 1-833-4-ASK-ODH ama booqo coronavirus.ohio.gov.



GURIGA JOOG
MARKA LAGA REEBO
SHAQADA IYO
IYO BAAHIYAHA KALE



XIRO WAJI
GASHAD MARKII
AAD KU DHAWDAHAY CID
AAN QOYSKIINA KA
TIRSANAYN



KU DADAAL INAAD KA
FOGAATO
UGU YARAAN 6 FUUDH
DADKA KALE



HA QABANIN ISKU-
IMAATIN DAD KA
BADAN
10 QOF



BADANAA BADAN
GACMAHA BIYO IYO
SAABUUN KU DHAQ (20
ILBIRIQSI
AMA KA BADAN)



HA KU TAABAN
INDHAHAAGA, SANKA,
AMA AFKA GACMO
AAN LA MAYDHIN AMA
KADIB TAABASHADA
OOGOYINKA



ISTICMAAL ADEEGYADA GURI
GAYNTA, BAABUUR
DAAQADDA UGA DHIIBIDDA,
IYO DOONASHADA



NADIIFI OO JEERMISKA KA
DIL "MEELAHA
TAABASHADU" KU BADAN
TAHAY



HA SHAQAYN
MARKII AAD BUKTO



KARANTIILKA KADIB KA
SOO LAABASHADA GOBOL
UU COVID-19 SI AAD AH
UGU FAAFAYO

Macluumaad dheeraad ah, booqo: coronavirus.ohio.gov